**FAAFINTA** **RASMIGA**

الجريدة الرسمية

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

لولاية ارض بونت الصومال

**Lam. 1**

**Sanadka 8-aad. Garowe 25. January. 2007**

جريدةالشهرية

**Faafinta bil walba soo baxda**

***Qeybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland***

Qiimuhu waa Sh.So 10.000 walba rukunka sanadkii waa Sh.So 170.000 dalka gudihiisa dibada Sh.So 500.000 rukunka la waydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3.000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wassaaradda maaliyadda.

---

# TUSMADA

## Qeybta Koowaad

## Sharci

## Qeybta labaad

## Xeer

## Qeybta Saddexaad

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

***Sharci Lr. 2. ee 15/01/2007, kuna saabsan Wasaaradda Cadaalada iyo Arrimaha Diinta.***

bogaga 105-106

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOMALIYA**

**Xafiiska Madaxweyne ku xigeenka Ahna sii hayaha xilka Madaxweynaha**

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**Office of the Vice-president being an acting president**

**Sharci Lr.2 ee 15/01/2007, kuna saabsan u bedelada Wasaaradda Cadaalada iyo arrimaha Diinta.**

**Madaxweynuhu**

| | | |
|---|---|---|
| **Markuu arkay** | : | **Dastuurka DGPl qodobkiisa 55-aad faqraiisa 1-aad.** |
| **Markuu arkay** | : | **Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Sumad XGGW/DGPL/189/2006 ee 16/12/2006.** |
| **Asagoo Garowsaday** | : | **Urogida xeer sharci Lr.2. Sharci iyo ansixinta Golaha Wakiiladu Sharciga ugu bedeleen.** |
| **Tixgaliyeyna** | : | **Doorka Maamul iyo siyaasadeed ee Wasaarada Cadaalada iyo Arrimaha Diintu u yeelatay Ha'ayadaha Garsoorka Puntland.** |

**Wuxuu soo saaray**

**Sharcigan soo socda:-**

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay xeer sharci Lr.2. u rogeen sharci iyagoo ku ansixiyey go'aanka sumada iyo taariikhda kore ku cad.

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, kan garyaqaanka guud iyo kan xog-hayaha Golaha Wakiilada.

**Qodobka 3-aad**

Dhaqan galka sharcigani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintii sharcigani faafinta rasmiga ah ee Dawlada ku soo baxay, wuxuuna kamid noqonayaa sharuucda Puntland, iyadoo cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhowro kuna dhaqmo.

**Wabilaahi Towfiiq**

**Mud. Xasan Daahir Maxamuud**
**Madaxweyne ku xigeenka**
**ahna Sii haya Xilka Madaxwenaha**

Puntland State of Somalia
Office of the Vice President
Garoowe

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

PUNTLAND STATE
OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Xeer-sharci Lr.02 ee December 7, 2006 kuna saabsan in wasaaradda Awqafta iyo Arrimaha Diinta loo beddelo wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta

**Madaxweynaha dowladda Puntland,**

Markuu arkay : Dastuurka Puntland,Qodobkiisa 54aad, faqraddiisa 10aad iyo Qodobka 98aad.

Markuu darsay : Baahida loo qabo in magaca wasaaradda Arrimaha Diinta & Awqaafta laga dhigo wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta, qodobka in la beddelo loo baahan yahayna yahay Qod.58aad,faqradda 1aad ee Dastuurka.

Markuu arkay : muhimadda uu beddelkaasi u leeyahay hay'adaha garsoorka

Markuu hubsaday : Inaan garsoorku xaq u lahayn arrimo maamul iyo siyaasadeed, kuwaas oo ay wasaaraddu wakiil uga tahay Golaha Xukuumadda,

Markuu garowsaday : In Guddiga Sare ee Garsoorku sharci ahaan leeyahay awoodaha magacaabidda,shaqo-gelinta,beddelka,dallacsiinta, anshaxa iyo abaalmarinta garsoorayaasha iyo shaqaalaha kale ee garsoorka,

Markuu dhegeystey : Golaha Xukuumadda,

**WUXUU XEERIYEY :**

1- In Golaha Wakiiladu beddelo qodobka dastuuriga ah ee Lr.58 aad faqaraddisa 1aad si loo helo magaca wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta.

2- In wasaaraddu ay hay'adaha garsoorka ku leedahay ilaalin guud kuna eg siyaasadda iyo maamulka.

**Maxamuud Muuse Xirsi**
**Madaxweynaha dowladda Puntland**